

Ujeedada ogeysiiskani waa in lagu wargaliyo waalidka/daryeelayaasha iyo ardaydaba xuquuqdooda Qayba Xeerka Dhaqan-celinta lambarka 504 ee 1973, Qaybta dufcada (Section 504 of the Rehabilitation Act of 1973). Qaybta 504 waa xeer madani ah kaasoo mamnuucaya midab takoor sababo naafanimo. Special School District No.1, Minneapolis Public Schools, waxay idin siinaysaa waalid ahaan ama daryeele arday u, iyadoo la raacayo hanaanka xuquuqda soo socota.

1. Waxaad xaq u leedahay inaad hesho nuqul ogeysiiskan ah marka degmadu tilmaanta, qiimayso, diiddo inay qiimayso, sameeyaan meelayn tacliimeed cusub, diiddo meelayn tacliimeed cusub, ama ay samayso isbeddel muuqda ee meelaynta cunugaaga sababo la xiriira naafadiisa.
2. Waxaad xaq u leedahay in la qiimeeyo cunugaaga hadii degmadu ay hayso sabab ay ku rumeeyaan in cunugaagu qabo naafo maskaxeed ama dhimireed/jireed, taasoo si xooggan uga xadidaysa waxqabadyada noloshu waaweyn. Waxaad xaq u leedahay qiimayntaasi inta aan qorshe kasta ee degaan la samayn iyo inta aan isbeddel ahmiyad weyn leh la samayn, qorshaha meelaynta cunugaaga. Tusaale ka mid ah isbeddelka meelaynta tacliimeed ahmiyadda weyn leh waa in loo diro eryid/burin/cayrin .
3. Cunugaagu wuxuu xaq u leeyahay tacliin bilaash ah oo ku habboon. Waxaad mas'uul ka tahay si taa la mid ah kharajka waalidka/daryeelayaasha carruurta aan naafada qabin. Waxuu noqon karaa (Tusaale ahaan qarashka safarka ama hadii buuggaag la siiyey oo uu cunuggaagu dhumiyey)
4. Inta xadka ugu macquulsan, cunugaagu wuxuu xaq u leeyahay in wax loo baro sida kuwa aan naafada qabin ee facooda/kufkooda/isaagooda ( non-disabled peers).
5. Waxaad xaq u leedahay inaad fiirisid dhammaan ndiiwaanada laga qoray cunuggaaga ee dugsiya yaala.
6. waxaad xaq u leedahay hanaan dhegaysi aan eex lahayn/daacad ah hadii aad doonayso inaad la beratanto wixii khuseeya cunugaaga aqoonsigiisa, qiimaynta, adigoo tixraacaya Qaybta 504. Waxaad xaq u leedahay inaad qof ahaan uga qayb qaadata dhammaan dhegeysiyada, ama garyaqaan ku matala, hadii aad doonayso inaad mid qabsatid qareen.
7. Haddii aad doonayso inaad u loolanto/baratanto tallaabo ay qaaday Koox qaybta 504 adigoo ula jeeda hanaan dhegaysi aan eex lahayn/daacad ah/garsoor leh, waa waajib inaad soo gudbiso Ogeysiis Racfaan ama ka codsato Dhegaysi Xiriiriyaha Degmada Qaybta 504 (Notice of Appeal or a Request for Hearing to the District's Section 504 Coordinator at:

Jennifer Crouch, LISW  
DPF – District Section 504 Coordinator  
Minneapolis Public Schools  
1250 W. Broadway Avenue  
Minneapolis, MN 5541

P: 612/668-0792  
F: 612/668-0855  
E: [jenny.crouch@mpls.k12.mn.us](mailto:jenny.crouch@mpls.k12.mn.us)

Waxaa lagu soo diraya taariikhda dhegaysiga iyo Garsoore loo magacaabay. Kaddibna waxaa lagugu wargalinayaa si qoraal ah taariikhda maxkamada, waqtiga iyo meesha.

8. Haddii aadan ku waafaqsanayn go'aanka xaakinka dhegaysiga, waxaad xaq u leedahay inaad raadiso dib u eegid ama milicsiga go'aankaasi, adigoo ka xaraynaya dacwad Maxkamadda Degmada ee Federaaligga ah.
9. Waxaad kale ood xaq u leedahay inay ka xarayso dacwad Xafiiska Xuquuqda Madaniga ah Waaxda Waxbarashada Dalka Maraykanka (Office for Civil Rights (OCR) of the United

Office for Civil Rights, Chicago Office  
U.S. Department of Education  
500 W. Madison Street, Suite 1475  
Chicago, IL 60661

P: 312/730-1560  
TDD: 800/877-8339  
F: 312/730-1576  
E: [OCR.Chicago@ed.gov](mailto:OCR.Chicago@ed.gov)

10. Marka uu ardayga gaaro da'ada Tixraac dufcada (Age of Majority 18 (\$645.45(14)), xaquuqda oo idil iyada oo la tixraacayo dufcada 504 waxaa laga wareejinayaa masuuliyada waalidka .waxayna ku wareegaysaa ardayga oo qoongaaray, hadii aadan u keenin dugsiyada dadweynaha Minneapolis warqad kasoo baxday maxkamad oo cadeynaysa in waalidku masuul ka yahay ardayga.

11. Ardayda iyo caruurta qaarkood ay da'doodu u dhaxeysi 3-21 ee caafimaad kooda ama maskaxdooda dhiman tahay waxaa laga yaabaa in ay mudanyihiin in ay helaan Qorshaha Waxrarashada Qaaska (Individual Education Plan) oo ku lasaysan waxbarashada dadka maskaxdooda ama lexdooda dhimantahay, siduu Xeerka Dadka Cuuryaaninta (Individual Disabilities Act, oo loosoogaabiyo I.D.E.A.) Waxaad halkaan ku qortaa wargalin ku aadan waxbarashada qaaska ah (Notice of Procedural Safeguards – Parental Rights for Special Education) Booqo- [http://speced.mpls.k12.mn.us/parental\\_rights](http://speced.mpls.k12.mn.us/parental_rights) si aad wax ugu ogaato xuquuqda canugaaga si uu u helo adeegyo waxbarashadeed ee gaar ah.